

Gurigaaga

Ujrada Golaha (Council Rates)

Markaad leedahay guri waa inaad lacag siisaa Golaha sannad kasta oo loo yaqaan lacagta macaashmacaashka . Macaashmacaashka waxaa loo isticmaalaa in lagu qabto adeegyada bulshda oo ay ku jiraan ururinta qashinka, wadooyinka iyo marshabiyeedka, iftiinminta baaggaga, baaggaga iyo jardiinooyinka iyo tasiilaadka madadaalada.

Goluhu wuxuu isticmaalaa qiimaha guryaha oo uu aasaas uga dhigaa xisaabinta intaad ka bixineyso macaashmacaashka guryaha. Waxaa sidoo kale jira lacag gaar ah oo layskaga qaado qashinka ee biinasha wasakhda ee 120 ka litir iyo 240 litirka biinasha waxyaalaha xumaada ee cagaaran sida dhirta.

Waxaad dooran kartaa inaad u bixiso macaashmacaashka guriga hal mar ama afar jeer inaad kala bixiso. Haddii aad ku bixineysid hal mar, waa inaad bixisaa lacagta oo dhan 15 Febaraayo ee sannad kasta.

Haddii aad doorato inaad u bixiso si si yar, lacagaha waxay bixintooda la rabaa maalmaha soo socda sannad kasta:

Haftada 1aad – 30 Siteembar

Haftada 2aad – 30 Nofeembar

Haftada 3aad – 28 Febaraayo

Haftada 4 aad – 31 Maajo

Wixii macluumaad dheeraad ah ama haddii aad rabto inaad ogaato sidii aad ku bixin lahayd macaashmacaashka guriga fadlan na soo wac.

Balaarinta gurigaaga ama dhisida guri cusub

Haddii aad dhiseyso guri cusub ama aad qorsheynaysid inaad gurigaaga balaariso, waxaad u baahan doontaa inaad dalbato ogolaanshaha qorshaha iyo ogolaanshaha dhismaha.

Shaqaalaha jooga Golaha Banyule way ku farxi doonaan inay ku siiyaan macluumaad iyo tallo si ay kaaga caawiso mashruuca dhismahaaga. Waxaan sidoo kale kaa caawin karnaa inaad abuurtid mashruuc dhismo oo waari kara.

Ogolaanshaha qorshaha ayaa laga yaabaa sidoo kale in loogu baahdo goynta geedaha.

Khataraha dabka

Si loo ilaaliyo qof walba ammaankiisa waa inaad ka dhigtaa gurigaaga mid xor ka ah khatarta dabka sida caws dheer iyo qashinba. Golaha waxaa laga yaabaa inuu baabiyo khatarta dabka adna aad kharashka bixiso.

Gurigaaga

Gubidda iyo waxyaalaha baxa

Si aad u yareyso diqowga hawada, laguuma ogola inaad isticmaasho baxa ama inaad wax ku shido bannaanka hawada leh. Alaabta aan loo baahneyn waa in burburiyaa, sida caleenta ku daadsan dhulka, dibna loo wershadeeyaa ama lagu ridaa biinasha qashinka.

Qalabka guriga ku xiran ee sheega dabka

Waa inaad hubisaa inaad leedahay qalabka dabka sheega oo shaqeynaya inuu ku xiran yahay gurigaaga si haddii dab uu dhaco deganayaasha uu ugu digo iyadoo alaarmigu kacayo. Waxaa wanaagsan in la bedelo bateriga lixdii biloodba mar, haddii aad sidaan sameyso bilowga iyo dhammaadka wakhtiga beekhaaminta iftiinka maalinta waa sahal in la xasuustaa.

Goynta cawska

Waxaad isticmaali kartaa mashiinka cawska lagu gooyo laga bilaabo 7 subaxnimo – 8 fiidnimo Isniinta ilaa Jimcaha iyo 9 subaxnimo ilaa 8 fiidnimo Sabtida iyo Axada iyo fasaxyada dadweynaha.

Laamaha soo laadlaada

Dhirta ama geedaha yar yar ee soo laadlaada waxay noqon karaan khatar. Fadlan gaabi oo gaarsii dhera\erka guriga iyo/ama dherer ku filan haka sareeyeen dhulka si loogu ogolaado dadku inay hoos maraan.

Lambarada Guryaha

Goluhu wuxuu siiyaa lambar guri kasta. Haddii aad leedahay ama aad degan tahay guri, waa inaad hubisaa in lambarka looga arkayo si sahal ah wadada. Tani waa muhiim si haddii ay jirto arin gargaar degdeg ah, Boliiska, ambalaasta ama adeega dabku ay u awoodaan inay kuu helaan si dhakhsa ah.

Beekhaaminta tamarta

Beekhaaminta tamarta waxay kuu keydinaysaa lacag iyo waxaaba ka sii muhiimsan, waxay yareynaysaa gaasaska waxyeeleeya jawigeena. Halkan waxaa ku qoran qaar ka mid ah siyaalo sahlan oo lagu beekhaamin karo tamarta:

- Demi nalalka iyo qalabka markaan loo baahneyn.
- Isticmaal buluubyada nalka ee tamar si haboon u isticmaala.
- Isticmaal qalab leh Tamar beekhaamin fiican hubina in si sax ah loo rakibay.
- Ku qalaji dharkaaga xariga dharka meeshii aad ka isticmaali lahayd makiinada qalajisada.

Gurigaaga

- Isticmaal buuxiyayaal, meelaha dilaacsan buuxi iyo godadka, albaabada xir.
- Demi kuleyliyaha ama mukeyfka markaad guriga ka baxdo.
- Qubeyskaaga yaree isticmaalna madaxa tuubada qubeyska oo haboon.
- Ku dhaq dharkaaga biyo qabow.
- Isticmaal gaadiidka dadweynaha, fuul baaskiilkaaga ama lugée.

Waxaad sidoo kale ku biiri kartaa barnaamijka Guryaha Waari kara adoo iska diiwaangelinaya www.sustainablehomes.vic.gov.au

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan degaanka iyo sidii loo daryeeli lahaa fadlan nala soo xiriiir.

Haddii aad jeclaan lahayn macluumaad dheeraad ah oo aad u baahan tahay caawimaada turjubaan fadlan la xiriiir TIS National 131 450 weydiina in lagula xiriiro Golaha Banyule 9490 4222.

Haddii kale waxaad la xiriiiri kartaa Golaha Banyule adoo soo wacaya kooxda Adeega Macaamiisha 9490 4222, booqanaya mid ka mid ah Xarumaha Adeegayaga ee Ivanhoe ama Rosanna ama iimeyl noo soo diraya enquiries@banyule.vic.gov.au